

Xaanshida Tilmaamaha Badqabka ee Janitorial

Taxanayaasha tilmaamaha caafimaadka iyo badqabka si looga hortago dhaawacyada shaqada kadhaha ee warshada janitorial



Iska Ilaali Khataraha Dahsoon!

Nofembar 2023



Miyaad arki kartaa halka badanaa irbadaha lagu qariyo?

- Dad badan oo nadaafadda ka shaqeeya ayaa irbado qashinka ku dhex arka. Waxay ku dhuuman karaan weelasha qashinka iyo sanduuqyada la tuuro (tusaale ahaan - qalabka la suro waraaqaha musqusha ee lagu tirtiro hoostiisa, ama qolqolka musqulaha).
- Irbadaha waxaa laga heli karaa meel kasta, musqulaha oo kaliya ma ahan – laakiinse meelaha u hareeraysan waxyaabaha sida waaskada fool-dhaqa iyo musqusha waxay qarinn karaan khatarro.

Dhaawacyada ka dhasha irbad mudidda ayaa ku badan shaqooyinka nadaafadda

- Mar walba eeg inta aadan gacamaha la galin meelaha ay adag tahay in la gaaro.
- Isticmaal qalab haddii aad u baahan tahay in aad gaarto meel aadan si cad u arki karin.
- Iska ilaali in aad gacmaha ku qabato bacaha ama weelasha qashinka –gacmo-gashiyo aan irbadaha ka soo dhexbaxin xiro marka aad gacanta ku qabanayso qashinka.
- Marnaba gacmahaaga oo maran haku qabanin irbadaha.

Haddii ay irbad kugu muddo shaqada:

1. Daryeel caafimaad raadso oo dhakhtarka u sheeg in ay shaqada kugu muday.
2. Adiga iyo dhakhtarkaaga waxaad buuxin kartaan sheegashada magdhowga shaqaalaha.
3. Loo-shaqeeyahaaga u sheeg.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan buuxinta xaqsheegashada:

<https://lni.wa.gov/claims/for-workers/injured-what-you-need-to-know/>